



## HAWLGALKA QARAMADA MIDOOBAY EE KAALMADA SOOMAALIYA (UNSOM)

### WARSAXAAFADEED 02/2013

#### **Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha-Guud ee Qaramadda Middobay u Qaablisan Arrimaha Soomaaliya oo hadal qoraal ah ka soo saaray weerarka loo geestay Xarunta - UNCC da**

**Muqdisho, 19 Juun 2013** – Ergaygga- Gaarka ah ee Xoghayaha-Guud ee Qaramadda Middobay u Qaablisan Arrimaha Soomaaliya, Nikolas Kay ayaa cambaareeyay weerarka loo geestay Xarunta ka Dhexaysa Hayaddaha Qarammada Middobay ee ka shaqeeyay Soomaalia, kuna taala Muqdisho.

Abaarihii 11:30 saakayto, gaari “pickup” ah lagana soo buuxiyay waxyaalo qarxa ayaa lagu horqarxiyay albaabka laga soo galo xarunta Qaramadda Midoobay horteeda, kadibna dadkii weerarka soo qaaday ayaa lug ku soo galay Xarunta. Kadib waxaa hal kaas ka dhacay xabado iyo qaraxyo kale, shaqaalahuna waxay ku gabadeen meel amaankeeda la adkeeyay.

“Dhab ahaan waxaan aad ooga naxay ugana xumaaday waxa maata ka dhacay Muqdisho. Shaqaalaha Qaramadda Midoobay ee ka shaqaya Arrimaha Baniadinimada iyo Horumarinta Soomaaliya ayaa degan Xaruunta kadhaxaysa Hayadaha Qaramadda Midoobay. Arrintani waxay aheed weerar argagaxisinomo oo iska cad iyo qar-iska tuurnimo ladoonayay in Soomaaliya looga leexiyo wadada ay ku soo kabsanaysay kuna dhisaysay nabadda.”

“Waxaa mahad leh in shaqaalahaanaga intiisa badani ay bad qabaan- waxna ay gaarin. Waxaan mahad u celinayaa Dowladda Soomaaliyeed iyo dadkeedaba, kuwaas oo nala wadaagay taageero iyo dareenkooda dhabta ah. Waxaa kale oo aan u mahad celinaynaa ciidamadda Soomaaliyeed iyo kuwa AMISOM- kuwas oo si dhakhso leh oo ay xirfadi kudheehantahy u soo gurmaday si ay u badbaadiyaan tobaneeyo ka mid ah shaqaalaha Qaramadda Midoobay oo isugu jiray Soomaali iyo Caalamiba ah.

Waxaan xaqiijinaynaa wararka ku saabsan dhibka ka dhacay meesha. Dhab ahaantii waxaa jiray qaar dhaawacmay iyo kuwo kale oo alga yaabo in ay arrintooda sii darantahay.

Saaxiibadanada Muqdisho jooga waa la ruxay, laakin Qaramadda Middobay waxaa ka goan in ay garab taagnaato dadka Soomaaliyeed. Waxaan tacsii gaarsiinayaa saaxiibadii iyo iyo qoysaskii ay dhamaan dadkii ku wayeeloobay ama ay saameysay arrintan.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta  
Mr. Ben Parker • + 252 699 280 697 or +252 616 142 177 • Email: [unsom-spokesperson@un.org](mailto:unsom-spokesperson@un.org)

**Fadlan eeg rugta Internet-ka:**

**[www.unsom.unmissions.org](http://www.unsom.unmissions.org)**



**[@UNSomalia](https://twitter.com/UNSomalia)**

**[facebook.com/UNSOMALIA](https://facebook.com/UNSOMALIA)**